# Fasalka 2017
## Liiska Hubinta Sharuudaha Qalinjebinta

**Magaca Ardayga:** ______________________________________________

Liiskaan sharuuduha qalinjabinta waxa loogu talogalay ardayda Fasalka 2017 (ardayda gashay fasalka 9aad sannad dugsiyeedka 2013–14). Si uu u helo diblooma, ardaygu waa inuu gudbo imtixaanada gobolka ee Farshaxannada Luuqadda Ingiriisida, Sayniska, iyo Xisaabta. Shuruudo dheeraad ah ayaa hoos ku taxan. Qeybta "Dhibcaha Dugsiga Sare" waxay ku xidhan tahay shuruudaha deegaanka.

Ardayda aan buuxin heerka qiimeynada gobolka ee caadiga ah ee looga baahan yahay qalinjabinta waxa dhici karta inay isticmaalaan beddello gobolku oggol yahay oo ku yaala bogga 2 ee qoraalka, iyada oo ku xiran mutaysiga.

Haddii uu ardaygu helo **adeegyada waxbarashada gaarka ah**, kooxdiisa Barnaamijka Waxbarashada ee la Gaar Yeelay (IEP) ayaa hagta go'aanka sheego qiimeynaaha ama beddellada ku haboon in lagu buuxiyo shuruudaha qiimeynta qalinjabinta (fadlan fiiri "Waxbarashada Gaarka ah iyo Imtixaanista Gobolka" www.k12.wa.us/Resources).

Ardayda kuwaas **oo u wareegaya** dugsiyada dadwayanaha Washington mid kood wuxuu codsan karaa ka dhaafida shuruudaha qiimeynta qalanjebinta, ee ku xiran xaaladooda, waxay u qalmi karaan inay galaan Beddelaadaha Qalanjebina iyaddoon la isku deyin xaalada qiimeynada.

Ka doono la-taliyaha dugsigaaga macluumaad dheeraad ah.

## SAACADAHA DUGSIGA SARE:

*Fiiri Xeerka Maamul Washington (WAC) 180-51-067 si aad tafaasiil uga hesho*

| | | |
|---|---|---|
| Ingiriis | Loo baahan yahay _____ | Kasbaday _____ |
| Xisaab | Loo baahan yahay _____ | Kasbaday _____ |
| Saynis | Loo baahan yahay _____ | Kasbaday _____ |
| Cilmiga Bulshada | Loo baahan yahay _____ | Kasbaday _____ |
| Fanka | Loo baahan yahay _____ | Kasbaday _____ |
| Caafimaadka & Jir dhisnaanta | Loo baahan yahay _____ | Kasbaday _____ |
| Luuqadaha | Loo baahan yahay _____ | Kasbaday _____ |
| Waxbarashada Xirfadeed | Loo baahan yahay _____ | Kasbaday _____ |
| Doorashooyinka | Loo baahan yahay _____ | Kasbaday _____ |
| Wax kale: ______________________________ | | |
| _______________ | Loo baahan yahay _____ | Kasbaday _____ |

## IMTIXAANADA GOBOLKA:

*Ka fiiri bogga 2 tafaasiil*

| | |
|---|---|
| Fanka Luqadda Ingiriiska | ❑ Gudbay |
| Saynis | ❑ Gudbay |
| Xisaab | ❑ Gudbay |

## QORSHAHA DUGSIGA SARE IYO DHAAFSAN:

Loogu talogalay inuu ardayda ka caawiyo inay si caadi ah uga fekeraan mustaqbalkooda oo ay doortaan koorso sida ugu fiican ugu diyaarineysa hadafyadooda dugsiga sare dhaafsan, la abuuray iyada oo la kaashanayo waalidiinta/wakiilada iyo shaqaalaha dugsiga.

❑ Buuxi

# Shuruudaha Imtixaanista Gobolka ee Fasalka 2017

| FARSHAXANNADA LUUQADDA INGIRIISKA | SAYNISKA | XISAABTA |
|---|---|---|
| **Sharuudaha farshaxannada luuqadda ingiriiska (ELA) waxa buuxiyey *(mid dooro):*** | **Sharuuda Sayniska waxaa la kulmay *(mid dooro):*** | **Sharuuda xisaabta waxa buuxiyey *(mid dooro):*** |
| Keenista ugu yaraan 2548 imtixaanka Smarter Balanced ELA. | Gudbidda imtixaanka Dhammaadka Koorsada Bayooljga (EOC). | Gudbidda hal imtixaanka Xisaab ah Dhammaadka Koorsada (EOC) ama imtixaanka ka-bixidda EOC.* |
| | | Keenista ugu yaraan 2595 imtixaanka Smarter Balanced Xisaabta. |
| Keenista buunda la jaray CIA ( Heerka 2) imtixaanka Smarter Balanced ELA* (ku xadidan ardayda waxbarashada gaarka ah, koox walboo IEP ah).+ | Keenista buundada la jaray CIA (Heerka 2) EOC* Bayoolajiga (ku kooban ardayda ku jirta waxbarashada gaarka ah, koox walboo IEP ah).+ | Keenista buundada la jaray CIA (Heerka 2) ee hal imtixaanka Xisaabta EOC* ama buundada la jaray CIA (Heerka 2) ee imtixaanka Xisaabta Smarter Balanced (ku xadidan ardayda ku jira gaarka ah, koox walboo IEP ah).+ |
| Gudbista ELA Gelitaanka Washington ee Waxbarashada iyo Cabirka (WA-AIM) (ku xaddidan ardayda leh dhibaato garasho oo weyn, koox walboo IEP ah).+ | Gudbista Sayniska Gelitaanka Washington ee Waxbarashada iyo Cabirka (WA-AIM) (ku xaddidan ardayda leh dhibaato garasho oo weyn, koox walboo IEP ah).+ | Gudbista Xisaabta Gelitaanka Washington ee Waxbarashada iyo Cabirka (WA-AIM) (ku xaddidan ardayda leh caqabadaha garashada weyn, koox walboo IEP ah).+ |
| Isticmaalka fursadda Isbarbar dhigga Darajooyinka.++ | Isticmaalka fursadda Isbarbar dhigga Darajooyinka.++ | Isticmaalka fursadda Isbarbar dhigga Darajooyinka.++ |
| Keenista 3 ama ka badan mid ka mid ah imtixaanada AP ama 4 ama ka badan mid ka mid ah imtixaanada IB loo oggolaaday ELA.++ | Keenista 3 ama ka badan mid ka mid ah imtixaanada AP ama 4 ama ka badan mid ka mid ah imtixaanada IB loo oggolaaday Sayniska.++ | Keenista 3 ama ka badan mid ka mid ah imtixaanada AP ama 4 ama ka badan mid ka mid ah imtixaanada IB loo oggolaaday Xisaabta.++ |
| Kasbashada  buundo ku filan SAT ama ACT Plus Writing.++ | Kasbashada buundo ku filan ACT.++ | Kasbashada buundo ku filan SAT ama ACT.++ |
| Gudbista ELA Ururinta Caddeynta (COE).++ | Gudbista Bayoolajiga Ururinta Caddeynta (COE).++ | Gudbista Xisaabta Ururinta Caddeynta (COE).++ |
| Gudbista imtixaanka heerka ka baxsan darajada xagga ELA (ku xaddidan fasallada 11aad iyo 12aad ee helaya waxbarashada gaarka ah, koox walboo IEP ah).+ | Gudbista imtixaanka heerka ka baxsan darajada xagga Sayniska (ku xaddidan fasallada 11aad iyo 12aad ee helaya waxbarashada gaarka ah, koox walboo IEP ah).+ | Gudbista imtixaanka heerka ka baxsan darajada xagga Xisaabta(ku xaddidan fasallada 11aad iyo 12aad ee helaya waxbarashada gaarka ah, koox walboo IEP ah).+ |
| Gudbista Imtixaanka Deegaanka lagu Go'aamiyey (LDA) xagga ELA (ku xaddidan fasaka 12aad ee helaya waxbarashada gaarka ah, koox walboo IEP ah).+ | Gudbista Qiimeynta Deegaanka lagu Go'aamiyey(LDA) ee Sayniska (ku xaddidan fasallada 12aad ee helaya waxbarashada gaarka ah, koox walboo IEP ah).+ | Gudbista Qiimeynta Deegaanka lagu Go'aamiyey(LDA) ee Xisaabta (ku xaddidan fasallada 12aad ee helaya waxbarashada gaarka ah, koox walboo IEP ah).+ |
| **Ardayda daba gasha dibloomada iyaga oo aan gudbin imtixaanka ELA gobolka Washington, waxaa sharuuda ka dhaafay, *(mid dooro):*** | **Ardayda dabagasha dibloomada iyaga oo aan gudbin imtixaanka Sayniska gobolka Washington, waxaa sharuuda ka dhaafay, *(mid dooro):*** | **Ardayda dabagasha dibloomada iyaga oo aan gudbin imtixaanka Xisaabta gobolka Washington, waxaa sharuuda ka dhaafay, *(mid dooro):*** |
| Gudbista imtixaanka ELA dugsiga sare ay OSPI-oggolaatay ee gobol kale.# | Gudbista imtixaanka Sayniska dugsiga sare ay OSPI-oggolaatay ee gobol kale.# | Gudbista imtixaanka Xisaabta dugsiga sare ay OSPI-oggolaatay ee gobol kale.# |
| Racfaan qaadashada sharuuda qiimeynta ELA ee gobolka maxaa yeelay waxaa jira xaalad khaas ah.## | Racfaan qaadashada sharuuda qiimeynta Sayniska ee gobolka maxaa yeelay waxaa jira xaalad khaas ah.## | Racfaan qaadashada sharuuda qiimeynta Xisaabta ee gobolka maxaa yeelay waxaa jira xaalad khaas ah.## |

* *Imtixaanada Xisaabta bixista EOC waxay ku saleysan yihiin Heerarka Barashada ee Gobolka Washington. Bayolojiga imtixaanka bixista EOC waxa uu ku saleysanyahay Heerarkii hore ee Barashada Gobolka Washington ee sayniska.*

** *Buundooyinka looga baahan yahay ardaydu inay kas badaan Shahaadada Kasbashada Shakhsiga (CIA) lama go'aamin ilaa Agoosto 2015. Buundooyinka waxa lagu dhawaaqayaa Nofeembar 2015.*

\+ *Go'aanka ku saabsan sida ardayga u qalma uga qeybqaato qiimeynta gobolka oo idil waa Barnaamijka Waxbarasho ee la Gaar Yeelay kooxda go'aanka, ma ahan go'aanka maamulka..*

++ *Ilaa arday loo wareejiyey dugsiyada dadweynaha Washington ee fasalka 11aad ama 12aad waa inuu isaga ama iyada iskudayaan qiimeynada gobolka halmar ka hor u qalmista beddellada aaga tusmo walba (www.k12.wa.us/assessment/GraduationAlternatives).*

\# *Waa in uu ku soo wareegay dugsiyada dadweynaha Washington kana soo wareegay gobol kale ama dugsi gaar loo leeyahay.*

\## *Waa in uu ku jiro fasalka 12aad buuxiyana shuruudaha **aadka** u xaddidan ee lagu sheegay Xeerka Maamul ee Washington (WAC) 392-501-601 si uu u dalbado.*

# Shuruudaha Imtixaanista Gobolka ee Fasalka 2017

## Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo

Ardaydu waa inay buuxiyaan dhowr kamid ah shuruudaha qalinjabinta gobolka iyo deegaanka si ay ku kasbadaan dibloomada dugsiga sare. **Bogga 1 ee dokumentigan waxa ku qoran liiska warbixinta ee shuruudaha imtixaanista. Bogga 2 wuxuu caddeynayaa ikhtiyaarada imtixaanista ee jira si loo oofiyo shuruudahan.**

Hoos waxa ku qoran jawaabaha qaar kamid ah su'aalaha badanka la iswaydiiyo ee kusaabsan imtixaanada gobolka. Macluumaad dheeraad, fadlan la xiriir la-taliyaha dugsigaaga ama booqo www.k12.wa.us/GraduationRequirements.

**Waa maxay shuruudda qalinjabinta imtixaanista gobolka dugsiga sare ee Fasalka 2017?**

Ardaydu waa inay buuxiyaan heerka farshaxannada luuqadda Ingiriisida (ELA), xisaabta, iyo sayniska si ay u mutaystaan qalinjabinta. Ka fiiri bogga 2 ee dokumentigan imtixaanada iyo beddellada.

**Ma jiraan ikhtiyaaro loogu talogalay ardayda mutaysatay adeegyada waxbarashada gaarka ah haddii imtixaanada gobolku aanu ku habbooneyn?**

Kooxaha Qorshaha Waxbarasho ee la Gaar Yeelay (IEP) waxay go'aamiyaan beddellada la oggol yahay ee ardayda helaya adeegyada waxbarashada gaarka ah ay isticmaali karaan si ay u oofiyaan shuruudaha qiimeynta qalinjabinta.

Degmadu waxay leedahay dariiqooyin u oggolaanaya ardayda mutaysatay waxbarashada gaarka ah in laga dhaafo shuruudaha koorso ama buundo marka uu jiro xiriir toos ah oo u dhexeeya ku guuldareysiga buuxinta shuruudaha koorsada ama buundada iyo ardayga naafada ah (fiiri WAC 180-51-115).

**Goorma ayey natiijooyinka imtixaanka dugsiga sare ee gu'ga la soo celinayaa?**

- **Imtixaanka u Diyaarinta Kulliyadda iyo Shaqada (Smarter Balanced):** Dhowr toddobaad gudahood marka ardaydu dhammeynayaan imtixaanka
- **EOC** Agoosto
- **WA-AIM:** Luulyo

**Goorma ayaan gali karaa imtixaan gobol oo aanan gudbin?**

- **Imtixaanka u Diyaarinta Kulliyadda iyo Shaqada (Smarter Balanced):** Nofeembar iyo Maarso-Juunyo
- **EOC** Janaayo-Febraayo iyo Maayo-Juunyo
- **WA-AIM:** Sebteembar-Nofeembar iyo Oktoobar-Abriil

Imtixaanada kale ee loo isticmaali karo beddellada qiimeynta qalinjabinta, sida SAT, ACT, AP, iyo IB, waxay leeyihiin wakhtiyo ay u sameeyeen ururrada bixiyaa. Gobolku qeyb kama aha jadwalladan imtixaanista.

**Maxaa dhacaya haddii aanan buuxin shuruudaha qalinjabinta qiimeynteyda, laakiin aan gudbay shuruudaheyga kale oo dhan?**

Kasban maysid diblooma. Gudbista imtixaanada gobolka ama beddelladu waa shuruud qalinjabin, ilaa lagu dhaafay xaaladaha *aadka* u xaddidan (ka doono la-taliyaha dugsigaaga macluumaad dheeraad ah).

**Haddii aanan gudbin imtixaanadeyda gobolka ama fasallada la rabay oo dhan, wali ma awoodaa inaan la socdo fasalkeyga qalinjabinta?**

Degmo dugsiyeedyada deegaanku waxay leeyihiin siyaasado sheegaya cidda ka qeybqaadaneysa xafladaha qalinjabinta.

**Ma qaadan karaa mid kamid ah ikhtiyaarada qiimeynta, sida ururinta caddeynta ama SAT, halkii qaadashada imtixaanada gobolka?**

Maya *halkii* imtixaanada gobolka, laakiin fursad dheeraad ah ahaan haddii *aadan k guuleysan* imtixaanada gobolka. Ardaydu waa inay isku dayaan imtixaan kasta oo gobolka ah ugu yaraan halmar kahor inat aysan galon beddellada gobolku oggol yahay.

Hase yeeshee, haddii arday loo beddelo dugsiyada dadweynaha Washington ee fasalka 11aad ama 12aad, shuruudo kale ayaa dhici kartaa inay u oggolaadaan ardaygu inuu galo beddellada qalinjabinta isagoon marka hore isku dayin qiimeynta gobolka.

**Imisa buundo ayaan u baahanahay si aan u qalinjabiyo?**

Marka gobolku u baahan yahay ugu yaraan 20 buundo, (eeg WAC 180-51-067); degmo dugsiyeedyada badankoodu waxay u baahan yihiin wax ka badan. ***Waa inaad buuxiso shuruudaha degmada deegaankaaga si aad u qalinjabiso.*** Fadlan ka hubi dugsigaaga si aad u ogaado shuruudahaaga qalinjabinta ee dhabta ah.**Haddii aan gudbo dhammaan buundooyinka gobolku u baahan yahay, ma kasban karaa dibloomada gobolka?**

Ma jirto diblooma gobol. Degmo dugsiyeedyada deegaanka ayaa bixiya dibloomada.

**Maxaa ii bannaan haddii aanan ku qalinjabin wakhtiga loogu talogalay?**

- **Sii joog dugsigaaga sare.** Waxbarashada dadweynaha K–12 waa bilaash ilaa 21 jirka.
- **Iska diiwaangeli Barnaamijka Dhameystirka Dugsiga Sare ee Kulliyadda Bulshada iyo Farsamada).** Barnaamijyadan waa lacag haddii aad u dhaxeyyso 16 iyo 18 jir. Haddii aad tahay 19 ama ka weyntahay, kulliyadaha waxa u bannaan inay kaa dhaafaan lacagta waxbarashada. Hubi haddii kuuliiyadda aad rabto inaad dhigato ay bixiso barnaamijka dhammeysashada dugsiga sare.
- **Ka bilaw koorsooyinka kuliyadda bulshada ama farsamada bilaa dibloomada dugsiga sare.**
- **Dabagal Shahaadada La Midka ah Dugsiga Sare.** Shahaado ayaa la kasbadaa kadib gudbista imtixaano isku daba xiga. Ardayda ka yar 19 jir waa inay fasax ka haystaan dugsigooda sare si ay uga qeybqaataan barnaamijka u dhignaanta dugsiga sare.